UNITED NATIONS NATIONS UNIES

Office for the Coordination of Humanitarian Affairs – Somalia

Warbixinta Xaaladda # 46 – 21 November, 2008

Is-beddelada Guud ee ugu Muhiimsan

Mashruuca FAO ee Maareynta Xogta Biyaha iyo Dhulka ee Soomaaliya (SWALIM) ayaa ku soo warbixiyey in halista daadadka ee haysata degaannada webiyada ee Koonfurta Soomaaliya ay hoos u dhacayso qaybta kore ee Webiga Jubba. Haseyeeshee, heerka biyaha ayaa weli sarreeya qaybta dhexe iyo tan hoose ee webiga Jubba. Sidaa daraaddeed, waxaa weli jira halis suurtagal ah in toddobaadka soo socda ay fatahaad yari ay ka dhacaan qaybaha hoose ee webiga Jubba. Heerka biyaha webiga Shabeelle ayaa kor u kocayey taas oo kor u qaaday welwelka gaar ahaan laga qabo agagaarka Jowhar ee Gobolka Shabeellaha Dhexe, iyo weliba degaannada kale ee ay ka socdaan hawlo beero-waraabin ah oo aan la xakameyn. Ka dib markii 17kii Nofembar la furey kannaalka xakameynta daadadka ee Baledweyne iyo iyada oo qayb ahaan la furey Kanaalka Shiinaha 18kii Nofembar, waxaa la filayaa in heerka biyaha ee webigu ay hoos u dhacaan. Iyada oo ay taasi jirto, haddana waxaa suurtagal ah inay fatahaad ka dhacaan meelaha gebiyada webigu ay hooseeyaan iyo qaybaha hoose ee webiga. Saadaasha roobka ee Itoobiya iyo Soomaaliya ee maalmaha soo socda ayaa tilmaamaya in roobab yar ay jiri karaan ama aanayba di'in. Wararka la xaqiijiyey ee barakaca ay keeneen daadadka ayaa sheegaya in 400 oo qoys ay hore uga barakaceen magaalada Baardheere ee gobolka Gedo.

Warbixinta UNHCR ee Dabagalka Socodka Dadka waxa ay sheegtey in 11kii – 12kii Nofembar, dad lagu qiyaasey 25,000 ayaa ka qaxeen magaalada Ceelwaaq, ee gobolka Gedo. Barakacaas waxaa keeney hawlgal nabadgelyo oo ay qaaddey Dowladda Kenya ka dib markii goob Kenya ka tirsan oo u dhow xadka Soomaaliya laga afduubey laba sooro oo Talyaani ah 10kii Nofembar. Ilaa iyo taariikhda 20kii Nofembar, 25,000 qof ayaa weli ku maqan barakac una baahnaa gargaar bani'aadamnimo degded ah.

16kii Nofembar, waxaa dagaal uu ka dillaacay degaanka Ceelasha Biyaha ee ku yaalla waddada Afgooye, dagaalkaas oo uu u dhexeyey laba kooxood iska soo horjeeda kana wada tirsan Midowga Maxkamadaha Islaamiga ah. Shan qof oo rayid ah ayaa ku dhintey. Dagaalku waxa uu sababay barokac muddo kooban socdey maaddaama barakayaashu ay soo noqdeen markii uu dagaalku istaagey. Xaaladda degaanka ayaa weli cakiran.

Nabadgelyo xumo ayaa si hooseysa uga jirtey qaybo kale oo ka mid ah Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya. 16kii Nofembar, laba bambo oo kuwa gacanta ah ayaa lagu tuurey suuqa weyn ee Baydhabo, ee gobolka Baay. Afar haween ah ayaa ku dhintey waxaana ugu yaraan ku dhaawacmey 13 kale oo haween ah.

Sida ay soo sheegeen la hawlagalyaasha dhinaca ilaalinta xaquuqda ee Somaliland, waxaa sii kordhaya weerarada loo geysto barakacayaasha ka dib markii 29kii Oktoobar qaraxyo is-miidaamin ah ka dhaceen Hargeysa. Maaddaama ay jirto halis soo noqnoqoneysa, barakacayaal badan ayaa ku warramey in ay ka tegayaan Somaliland. Sida ay soo sheegeen la hawlgalayaasha dhinaca Dabagalka Socodka Dadka waxa ay ku soo warameen in toddobaadkii la soo dhaafey ay 400 oo qof ay ku soo noqdeen Muqdisho iyada oo ay weli nabadgelyo-xumadu jirto.

Ilaa 21,300mt oo cunto kala duwan ah oo saaran saddex markab oo ay NATO gelbineyso ayaa ka shiraacdey Mombasa una safrey Soomaaliya 20kii Nofembar. Markab dagaal oo Turki ah oo NATO ka socda ayaa Mombasa ka gelbiyey 11,000mt oo cunto ah oo ku socota dekadda Berbera oo ku taalla Gacanka Cadmeed ee Somaliland. Kani waa safarkii koowaad ee ay NATO u gelbiso Berbera. Ciidanka badda ee Giriigga ayaa dekadaha Marka iyo Muqdisho u gelbiyey laba markab oo siddey 10,300mt.

19kii Nofembar, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobey ayaa sameeyey codsi uu ku codsanayo US$ 7 bilyan oo lagu bixinayo gargaar bani'aadamnimo oo la gaarsiinayo 30 milyan oo qof oo ku kala nool 31 dal oo dunida ah oo ay Soomaaliya ka mid tahay. Codsiga Bani'aadamnimo ee 2009

ayaa ah codsigii ugu weynaa ee weligii la sameeyo ilaa iyo intii la bilaabey Geeddi-socodka Codsiyada Wadajirka ah sanadkii 1991. Codsiga 2008 waxa uu ahaa US$ 3.8 Bilyan oo loo codsadey 25 milyan oo qof. 1dii Disembar 2008, codsiga Soomaaliya ee 2009 ayaa lagu qaban doonaa Nayroobi, taas oo lagu codsanayo ilaa US$ 900 milyan oo lagu beegsanayo 3.2 milyan oo qof.

Waxqabadka (*Response*)
Labadii toddobaad ee ugu horreeya Nofembar, WFP Soomaaliya ayaa 19,900mt oo cunto kala duwan u dirtey Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya taas oo qayb ka ah qorshaha cunto qaybinta bisha Nofembar. In kasta oo lagu jiro xilli roobaad welina jirto nabadgelyo xumo, haddana 60 boqolkii qorshihii cunto qaybtina (32,950 mt) ayaa howlgalay. Bisha Nofembar keliya, WFP waxa ay beegsaneysaa 39,000mt oo cunto kala duwan ah inay gaarsiiso 2.3 milyan qof oo kuwad sugan Soomaaliya.

13kii Nefembar, WFP waxa ay cunto gaarsiisey 400,000 barakacayaal ku nool waddada Afgooye ee gobolka Shabeellaha Hoose. Kolonyo baabuur ah oo ka soo baxday Muqdisho ayaa si nabadgelyo ah Afgooye ku geeyey 4,230 mt oo cunto ah.

WFP waxa ay sii waddey hawlaheedii barnaamijka ee ay ka waddey Somaliland ka dib markii ilaa hal toddobaad si ku meel gaar ah loo joojiyey markii ay qaraxyada ka dhaceen Hargeysa. Toddobaadkan dhexdiisa, WFP waxa ay qeybisey 522mt (45% intii la qorsheeyey Nofembar) kuwaas oo qayb ka ahaa mashaariic kala duwan. Cunto-rarista ayaa gaabis ugu socotey sababo la xiriira welwel laga qabey dhinaca nabadgelyada daraaddeed oo sababey in shaqaalaha si joogto ah ay shaqada u soo xaadiri waayeen. WFP waxa ay sidoo kale bilowdey bixinta Agabka Aan Cuntada Ahayn oo isugu jira maacuunta wax lagu karsado iyo kuwa wax lagu cuno oo loo qaybiyey 105 dugsiyo cusub oo Somaliland ku yaalla si loogu fuliyo barnaamijka quudinta dugsiyada.

WFP waxa ay 758 mt oo cunto kala duwan ah u qaybisey ilaa 44,620 ka-faa'iideystayaal oo ku nool Waajid, Baydhabo iyo Garbahaarey oo ka kala tirsan gobollada Bakool, Baay iyo Gedo taas oo qayb ka ahayd barnaamijka cunto-qaybinta guud iyo kan qaybinta cuntada dheeriga ah. Nabadgely-xumada ayaa saameysey fulinta qaar ka mid ah hawlihii barnaamijka ee loo qorsheeyey qaybo ka mid ah Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya.

Wixii faahfaahin dheeri ah oo xogta Afka Ingiriisiga ah kala soo xiriir: Rita Maingi on +254 734 800 120 – maingir@un.org,
Xogta Af-Soomaaliga kala soo xiriir Mona Mohamed on + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org
Website address: http://ochaonline.un.org/somalia